



Tilmaamaha mashruuca Fanaaniinta ee Seattle Center 2025-2026

Dulmarka Deeqaha

Mashruuca Fanaaniinta Seattle Center waa wada shaqayn sanado badan socota una dhaxeysa [Seattle Office of Arts & Culture](#) (Xafiiska Fanka iyo Dhaqanka ee Seattle) iyo [Seattle Center](#) (Xarunta Seattle), oo taageero ka helaya [Uptown Arts & Culture Coalition](#) (Iskaashatada Dhaqanka iyo Fanka ee Aptown) iyo jaaliyadaha ku teedsam Seattle Center. Barnaamijkan waxaa suurtageliyay deeqda dheefaha bulshada oo 10-sano ah oo laga helo [Climate Pledge Arena](#) iyo [Seattle Kraken](#), laga so bilaabo 2021.

[Mashruuca Fanaaniinta Seattle Center](#) wuxuu maalgaliya fanaaniinta shaqsiya ah, hawlaha fanaaniintu hogaamiyaan, kooxaha bulshada, iyo ururada si ay u horumariyaan oo ay ugu soo bandhigaan bandhigyada Seattle Center sanadka oo dhan. Noocyada farshaxanka waxaa ku jiri kara muusig, qoob ka ciyaar, masrax, bandhigyo, iyo shaqo qaabab kala duwan ah. Bandhigyada booqashada ah waxaa la qorsheeyay inta u dhaxaysa Noofembar 2025 iyo Sebtembar 2026. Ka qaybgalayaasha la xushay waxay heli doonaan mid ka mid ah \$2,000, \$4,000, ama \$6,000 oo ah maalgelin ku salaysan fannaaniinta/kooxda cabbirka iyo baaxadda shaqada. Barnaamijyada la abaalmariyey xilligan hadda (2024-2025) uma qalmaan inay codsadaan xilliga 2025-2026.

Wixii macluumaad ah iyo caawimaadda codsiga, fadlan tixraac [Su'aalaha Inta badan la Isweydiyo](#), ama la xirii Zach Frimmel, Maamulaha Mashruuca Fanaaniinta Seattle Center, (206) 963-9226 ama Zach.Frimmel@seattle.gov.

Waxaan haysanaa turjubaano ku gula hadli kara luqadaada, kuwaaso ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan). Na soo wac oo noo sheeg luqadaad ku hadasho. Filo hakad gaaban inta aan ka helayno turjumaan si uu ugu soo biiro wicitaanka.

Codsiga

Ku soo gudbi codsigaaga onlayn adoo ku soo diraya Websiteka deeqda ee magaalada Seattle: https://seattle.fluxx.io/user_sessions/new

Haddii aadan haysan kombuyuutar ama internet, ama aad qabto caqabado kale oo xagga codsashada ah, la xirii Zach Frimmel, Maareeyaha Mashruuca Deeqaha, (206) 963-9226 ama Zach.Frimmel@seattle.gov. Maareeyaha Mashruuca wuxuu u baahan yahay ugu yaraan laba (2) usbuuc ka hor taariikhda codsiga la iska rabo si uu u bixiyo taageero.

Taariikhda ugu danbaysa ee la codsan karo

Talaado, Juun 17, 2025, 5 galabnimo (Pacific)

Fadlan u ogolow wakhti ku filan oo aad ku buuxiso oo aad ku soo gudbiso codsigaaga; codsiyada la soo gudbiyo ka dib waqtiga kama danbaysta ah 5 pm (Pacific) lama aqbali doono.

U qalmida

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato deeqdan haddii aad buuxiso shuruudaha soo socda:

- Waxaad tahay fanaan shaqsi ah, koox wadareed uu hogaamiyo fanaan, urur, ama koox Bulshada ku salaysan oo si joogto ah ugu soo bandhigta shaqada Seattle.
- Waxaad ku taal King County ama King County aan la wadaagin (unincorporated) gudaha Gobolka Washington.
 - Ururada iyo fanaaniinta shaqsiga ah ee matala bulshooyinka sida aadka ah uu u saameysey cadaadiska nidaamka oo ay ku jiraan dadka dakhligoodu hooseeyo, dadka naafada ah, bulshooyinka soo-galootiga iyo qaxootiga, iyo bulshooyinka midabka leh ayaa lagu dhiirigelinayaa inay codsadaan.
- Waxaad haysataa nambarka Aqoonsiga Canshuuraha ee Federaalka (Social Security, ITIN, ama Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha) oo kuugu qoran, ama aad ku leedahay barnaamij hadda jira oo firfircoon, oo Magaalada Seattle ka jira.
 - Kooxaha codsanaya loogama baahna inay noqdaan 501 (c) (3) urur aan faa'iido doon ahayn, sidoo kale loogama baahna inay isticmaalaan wakiil maaliyadeed.
- Waxaad u soo gudbin kartaa hal codsi wareeg kasta barnaamijkan.
- Codsadayaal badan uma soo gudbin karaan codsiyo kala duwan Barnaamij isku mid ah.
- Barnaamijyada la abaalmarayey laga soo bilaabo xilliga hadda (2024-2025) **uma qalmaan** inay codsadaan xilliga 2025-2026.

Mashruucaaga/dhacdadaadu waxay xaq u leedahay in lagu maalgeliyo deeqdan haddii ay buuxiso shuruudaha soo socda:

- Dhacdadaadu waxay ahaan doontaa mid bilaash ah oo u furan dadweynaha laguna qabto mid ka mid ah goobaha Seattle Center ee u-qalanta.
- Dhacdadaadu waxay ahaan doontaa inta u dhaxaysa 40-90 daqiiqo.

Maalgelinta

Waxaad u isticmaali kartaa lacagaha abaal-marinta kharashyada la xidhiidha soo-bandhiga, sida: khidmadaha farshaxanimada, khidmadaha suuq-geynta iyo xayaysiinta, maamulka mashruuca, kharashaadka shaqaalaha, saadka, kiraynta qalabka ama kharashyada kale ee la xidhiidha wax-soo-saarka, caymiska loo baahan yahay, iyo ilaa 10% kharashyada cuntada la xidhiidha. Kharashyo dheeri ah ayaa laga yaabaa in la ogolaado hadii uu ogolaado maamulaha mashruuca deeqda.

Lacagaha deeqdan laguma dari karo ilaha kale ee maalgalinta Magaalada ama lacagaha lagu taageerayo dhacdo kale oo Seattle Center ah (tusaale Festál, Folklife, iwm.). Codsadayaasha looma ogola in lagu maalgeliyo isla mashruuca/dhacdada laba jeer magaalada Seattle.

Codsadayaashu waxay codsan karaan heerarka soo socda ee maalgelinta:

- \$2,000 abaal-marin (sida caadiga ah 1-2 fannaaniin), oo lagu daray \$750 taageero wax-soo-saar ah oo laga helo Seattle Center
- \$4,000 abaal-marin (sida caadiga ah 3-5 bandhige), oo lagu daray \$1,360 taageero wax-soo-saar ah oo laga helo Seattle Center
- \$6,000 abaal-marin (sida caadiga ah 6+ bandhige), oo lagu daray \$1,800 taageero wax-soo-saar ah oo laga helo Seattle Center

Kulamada Macluumaadka

Baro wax badan oo ku saabsan barnaamijka iyo sida loo gudbiyo codsigaaga ugu fiican.

Macluumaadka Kulanka 1aad mid isku jira (fogaan arag ah/qof ahaan)

Khamiis, Meey 22, 4:00 - 5:20 galabnimo (Pacific)

Qof Ahaan: Seattle Center Armory, Room 301

Fogaan arag: Webex

[JAWAAB-CELIN](#)

Macluumaadka Kulanka 2aad mid isku jira (fogaan/qof ahaan)

Khamiis, Juun 3, 10:00 - 11:20 subaxnimo (Pacific)

Qof Ahaan: Seattle Center Armory, Room 301

Fogaan arag: Webex

[JAWAAB-CELIN](#)